# CUSBOONAYSIINTA QIYAASTA GAADIIDKA SEATTLE
# Milicsi

## Qiyaasta Gaadiidka ee Seattle ayaa loo diyaariyey in la cusboonaysiiyo

Seattle Transit Measure waxay ka soo muuqan doontaa codbixinta Noofambar 2026. Haddii ay ansixiyaan codbixiyayaashu, Cusboonaysiinta Seattle Transit Measure ee 2026 waxay u oggolaanaysaa magaalada inay ururiso 0.3% canshuurta iibka muddo 10 sano ah si loo hagaajiyo adeegga gaadiidka dhammaan waqtiyada maalinta loona kordhiyo helitaanka gaadiidka, taas oo dadka ku xiraysa fursado isla markaana daboolaysa baahiyahooda safarka ee maalinlaha ah.

Haddii ay ansixiyaan codbixiyayaasha Seattle, Cusboonaysiinta Qiyaasta Gaadiidka Seattle ee 2026 waxay beddeli doontaa Cusboonaysiinta Qiyaasta Gaadiidka Seattle ee 2020 ee dhacaysa. STM-da dhacaysa waxay soo saartaa in ka badan $50 milyan sanadkii ilaa Abriil 2027 si loo maalgeliyo maalgashiyada gaadiidka.

## MAXAY MAALGELIN DOONTAA CUSBOONAYSIINTA QIYAASTA GAADIIDKA EE SEATTLE?

### Iyada oo loo marayo ku dhawaad $138 milyan oo maalgashi sanadle ah, Soo jeedinta Cusboonaysiinta STM ee 2026 waxay doonaysaa inay maalgeliso:

- **275,000 safarro bas ah** oo Seattle gudaheeda ah sanad kasta, 95,000 safaro ka badan kuwa maanta
- **Adeeg bas oo ka fiican 24/7**. Taasi waxay ka dhigan tahay safarro badan oo Sabtida iyo Axadda ah, iyo safarro badan oo bartamaha maalinta iyo habeenkii ah oo ka baxsan saacadaha caadiga ah ee dadka shaqeeya
- **Diirad joogto ah oo la saarayo adeegga dadka sida ugu badan ugu tiirsan gaadiidka**
- **Kaadhadh ORCA oo bilaash ah oo loo sameeyo 22,000 qof** si loo yareeyo caqabadda fuulista gaadiidka ee dadka danyarta ah, dadka waayeelka ah, iyo qoysaska leh carruur yaryar
- **Ku shaqaynta labada khad ee Seattle Streetcar,** iyadoo la siinayo dadka marin ay ku gaaraan goobaha muhiimka ah ee deegaanka, shaqooyinka, dugsiyada, iyo shabakadda tareenka fudud ee gobolka
- **Hormarinta Wadooyinka** ee la beegsaday meelaha ay basasku dib u dhacaan, taas oo dhimaysa waqtiyada safarka isla markaana kordhinaysa isku hallaynta
- **Shaqaalaha magaalada oo bixiya rukhsadaha lagama maarmaanka ah iyo kormeerka dhismaha si tareenka fudud loogu dhiso si degdeg ah oo ammaan ah.** Tani waxay sidoo kale hagaajin doontaa helitaanka saldhigyada mustaqbalka oo ay ku jiraan Graham Street iyo mashaariicda Sound Transit ee West Seattle iyo Ballard Link Extension

***Doolar kasta oo STM ah oo ku baxaya adeegga gaadiidka wuxuu gacan ka geystaa ka dhigista gaadiidka mid ammaan ah*** *iyadoo la taageerayo dadaallada amniga ee Metro iyo bixinta adeeg joogto ah oo la isku halayn karo. 6 milyan oo doolar ayaa sanad walba lagu maalgelin doonaa dadaallada amniga ee Metro. Intaa waxaa dheer, basas badan iyo sugitaan gaaban waxay ka dhigan tahay safar ammaan ah oo raaxo u leh qof walba.*

Seattle Department of Transportation




*Ku dhawaad 6 milyan oo doolar ayaa sanad walba lagu maalgelin doonaa dadaallada badbaadada iyo amniga gaadiidka.

## Kani muxuu ugu kici doonaa cashuur bixiyayaasha Seattle?

Kharashka qoyska Seattle ee laba qof ah ee dhexdhexaadka ah, oo hela $124,000 sanadkii, waxa la filayaa inuu noqdo ku dhowaad **$58 sanadkii, ama $4.83 bishii**. Tani waa $29 sanadkii ka badan, ama $2.42 bishii ka badan, inta qoyska Seattle ee dhexdhexaadka ah maanta ku bixiyo Qiyaasta Gaadiidka Seattle.

## Canshuurta iibka oo ah il maalgelin

Canshuurta iibka waxaa bixiya qof kasta oo iibsada alaabaha u qalma ee Magaalada, oo ay ku jiraan dadka deegaanka, shaqaalaha, dadka soo booqda, iyo ganacsiyada.

**Alaabaha muhiimka ah waa laga dhaafay**



Dawooyinka & qalabka caafimaadka | Dukaamada Raashinka | Lacag-bixinta kirada iyo amaahda guriga | Daryeelka shakhsi ahaaneed & alaabta dhallaanka

## Nala soo xiriir

Noo soo dir iimayl cinwaanka STM@seattle.gov si aad u weydiiso su'aalo ama aad u codsato warbixin macluumaad ah oo loogu talagalay kulanka ama isu-imaatinka bulshadaada.

**WAX BADAN KA OGOW**
Seattle.gov/transportation/seattle-transit-measure/renewal
206-684-ROAD (7623)